Mankato Clinic

# TILMAAMAHA BUKAANKA EE MRI

## MRI Arthrogram

Bukaanka:______________________________________________________ Taariikhda Balanta: ____________________

Waqtiga Imaanshaha: _____________________ subaxnimo/galabnimo

Goobta: Mankato Clinic
1230 East Main Street, Mankato, MN 56001

### Fadlan soo mar Xafiiska Diiwaangalinta kahor intaadan imaan miiska Baaritaanka Raajada.

Hadaadan awoodin inaad balanta ku timaado ama aad qabto wax su'aalo ah, fadlan wac (507) 389-8570.

#### Waa maxay MRI Arthrogram?

MRI arthrography waxaa loogu talagalay in lagu baaro xanuunada kalagoysyada. Daawada wax iftiimisa ayaa lagu durayaa kalagoyskaaga iyo meelaha udhawdhaw ee kalagoyska kamidka ah. Tani waxay gacan kagaysanaysaa kobcinta araga unugyada kalagoyska.

### Sidee ayaan ugu diyaar garoobayaa baaritaanka:

- Kahor intaadan iskuqorin baaritaanka, fadlan usheeg adeeg bixiyahaaga hadaad leedahay mid kamid ah waxyaabaha soo socda: qalabka wadna garaaca fududeeya, waayirada nerfaha maskaxda, qalabka cochlear/gudaha/dhexda dhagaha lagashto, uur, dhaawaca xabad ama wax kumuday, dhaawac isha kaaga dhaca kaasoo kayimaada wax bir ah ama shay banaanka isha kasoo galay.
- Fadlan usheeg dhakhtarkaaga hadaad wax xasaasiyad ah kuqabto daawada halboowlaha lagu muddo (daawada raajada iftiimka ee IV), ama aad waligaa xasaasiyad kaqaaday shay. Waxaa laga yaabaa inaad ubaahato daawo gaar ah kahor intaadan baaritaanka galin.
- Waxaan soojeedinaynaa inaad laxariirto shirkadaada caymiska kahor intaadan balansan baaritaanka si aad ufahanto waxa caymiskaagu kaabixin karo baaritaankaan.
- Waa inaad kadheerataa cunis waxkasta oo culus kahor intaan lagu durin.
- Fadlan kafagoow qaadashada wax daawo nooca dhiiga qafiifisa ah taasoo UUSAN kuuqorin dhakhtarkaagu maalinta baaritaanka (tusaalayaasha qaarkooda waxaa kamid ah: Advil, ibuprofen, aspirin iyo aspirin yaryar).
- Hadaad cunto daawo kale oo dhiiga qafiifisa, fadlan kalatasho dhakhtarkaaga wixii kusaabsan tilmaamaha qaabkaad daawadaas ujoojin lahayd.
- Hadaad qaadato **cirbada sinaha ama kalagoyska SI** , darawal gurigga kuukaxeya ayaa **LOOBAAHAN YAHAY** kadib marka baaritaanku kuudhamaado. Ma awoodi doontid inaad gaari wado inta maalinta kahartay.
- Fadlan sooxiro maryo jilican, oo raaxo leh oon lahayn jiinyeero, badhano ama waxyaabaha kale ee birta ah.
- Waa inaad iskabixisaa dhamaan waxyaabaha birta ah, cidiyaha birta ah, waxa la isku qurxiyo iyo jijimaha kahor baaritaanka. Hadaad leedahay ilko macmal ah waxaa lagaa codsan doonaa inaad iskasiibto baaritaanka kahor.

### Waxa dhacaaya inta baaritaanku socdo:

- Kahor intaan lagu galin iskaanka MRI, foomka baaritaanka badqabka sawirka MRI ayaa dib u eegis lagu samaynayaa kadibna adigga iyo khabiirka sawirka MRI kusaaraaya ayaa saxiixaaya.
- Waxaan lagaa codsanyaa inaad qaybta dhar badalashada gasho aanda iskasiibto waxkasta oo bir kasamaysan.
- Meesha labaaraay waxaa lagu fiirinayaa qalabka fluoroscopy si loo go'aansho nooca baritaan ee ugu haboon.
- Kahor intaan baaritaanka lagalin, maqaarka waxaa lagu dhaqayaa suuf leh daawada cayayaanka si meesha looga saaro bakteeriyada maqaarka dul fuusha. Banbiiro ama shukumaan dalool leh ayaa lasaarayaa maqaarka si loo abuuro meel sawirku qabto.
- Khabiirka raajada ayaa kugu dhufan kara cirbada daawada suuxinta oo looyaqaano lidocaine si loo kabuubyeeyo meesha raajada. Waxaad dareemi karaa culays/cadaadis yar oo arintaan kugu keento.
- Cirbad dhuuban (fiiqan) ayaa intaas kadib lagu durayaa kalagosyka/curaancurta. Meesha ka hoosaysa qalabka fluoroscopy, waxaa lagaaga duri karaa daawada iftiinka kordhisa meesha kabanaan kalagoyska si looxaqiijiyo in cirbadu meel sax ah kumudanto.
- Kadibna waxaa lagu gaynayaa MRI da halkaasoo laguu sheegi doono inaad miiska iskaanka kuseexato. Duub qaas ah ayaa lasaarayaa meesha udhaw aaga iskaanka lagaa marinaayo.
- Marka baaritaankaaga MRI biloowdo, waxaad maqlaysaa codad degdega ah oo isdaba joog ah kuwaasoo kasoo yeeraaya geesaha iskaanka. Waxaa laguu xirayaa qalab maqalka difaaca si lagaaga dhaga xiro dhawaaqa mashiinta.
- Aad ayay muhiim utahay inaad kadheeraato dhaqdhaqaaqa.
- Baaritaankaagu wuxuu qaadanayaa kudhawaad 2 saacadood ilaa laga dhameeyo.

**Tilmaamaha baaritaankaaga kadib:**

- Faashad ayaa lagaaga duubayaa meesha cirbada lagu duray, waxaana lagaa siibi karaa labo saacadood kadib.
- Aaga ayaa noqon kara mid jadkaan ama nabar leh muddo dhawr maalmood ah kadib cirbada. Si aad xanuunkaan iskaga yarayso, waxaad:
    1) Qaadan kartaa 1-2 kaniini oo daawada acetaminophen (Tylenol) ah 6 saacadoodba mar
    2) Iska saari kartaa bakada ama duub baraf ah
- Waxaad sii wadi kartaa shaqadaada/hawlshaada caadiga ah ee jadwalka kuugu jirtay hadaadan wax xanuuna dareemayn.
- Fadlan kafagoow inaad qubaysato, hawlo adag samayso, jimicsi samayso (tusaale, inaad orodo, ciyaarta kubada teenista, jimicsiga) ama qaadista waxyaabaha culus muddo 24 saacadood ah.
- Dhibaatooyinka ama halisaha suuragalka ah laakiin aan badanaa dhicin ee baaritaanka kadhalan kara ayaa noqon kara: barar, nabar, cuncunka jirka/isbadalo kudhaca midabka, caabuqa, xasaasiyada, dhiigbax, daal dhanka xubnaha shaqada ah (gacanta/lugta), murmurxa wajiga ama ciribaha kalagoyska oo jaba.
- Hadaad qabto wax walaacyo ah, aad isku aragto xanuun ama jileec meesha kusoo badanaaya, barar xad dhaaf ah, murmurux ama wax soobuuran, fadlan laxariir dhakhtarkaaga asaasiga ah.
- Baaritaankaga waxaa fiirinaaya oo akhrinaaya dhakhtarka Raajada 24 saac ee kuxigga baaritaanka kadib.
- Warbixinta kama danbaysta ah oo saxiixanayaa loo dirayaa dhakhtarkaaga kuusoo diray iskaanka.
- Laxariir dhakhtarkaaga daryeelka si degdeg ah hadaad caabuq ama barar ku aragto meeshii cirbada IV ga lagaaga muday.
- Natiijooyinka baaritaankaaga waxaad kahelaysaa Barta Bukaanka isla marka uu dhakhtarkaagu dhameeyo daraasaynteeda. Dhakhtarkaaga ayaa kaaga waramaaya natiijooyinka marka la gaaro balantaada dabagalka ah. Hadaadan lahayn balan dabagal ah, dhakhtarkaaga ayaa qoraal kuusoo diraaya ama taleefan kaasoo wacaaya shan ilaa todobo maalmood gudahood.